

Xeer Madaxweynaha Jamhuuriyadda lamba. 11 ee 22 Janaayo 1966

Xeerinka qaab dhismaha iyo magacaabidda shaqaalaha rayida iyo nidaamka dhaqaalahooda

MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA

Kadib markii la arkay qodobka 77 ee ee Dastuurka;

Kadib markii la arkay qodobada 35 iyo 38 ee sharciga ee 15 Maarso 1962 iyo xeerarka wax ka beddelidda ee shaqaalaha rayidka;

Kadib markii la arkay qodobka 9 ee sharciga lamba. 14 ee sharciga 3 Juun 1962 iyo sharciga wax loogaga beddelay ee xeernidamiyada Dowladda;

Kadib markii la arkay qodobada 6 iyo 8 ee dekreetada- sharciga lamba. 6 ee 30 Maarso 1965 kaas oo loogu beddelay sharci lamba. 7 ee 1 Juun 1965 kaas oo khuseeya qaab-dhismeedka iyo nidaamka dhaqaalaha ee shaqaalaha;

Kadib markii la arkay D.P.R. lamb 505000 ee 16 Janaayo 1966 ee brotokolka qaab dhismaha iyo magacaabidda shaqaalaha rayidka ee dowladda;

Kadib markii la arkay D.P.R. ee lamba. 50500 ee 16 Janaayo 1966 oo Brotokol ee qaab dhismeedka iyo magacaabidda shaqaalaha rayidka oo aan howl u haynin maamulka dowladda;

Kadib markii la tixgeliyey joodinta Guddiga Dib-u-eejiida mushaaraadka laga ansixiyey Golaha Wasiirada oo lagu qoray warqadda lamba. 56181 ee 11 Nofeember 1965 ee Xafiiska Guud ee qaab-dhiseedka iyo shaqaalaha;

Kadib markii la tixgeliyey aragtida Rai'sul Wasiirka;

Kadib markii la dhegeysta soo jeedinta Golaha Wasiirka.

WAXAA LA SOO SAARAY

Qod. 1

1. Qeyb ka mid wax ka bedelka D.P.R lab 5049 ee 16 Janaayo 1966, shaqaalaha lagu qoray qaab-dhismeedka loona magacaabay darajada iyo qeybaha A2, A3, A4, A5, A6, B7, iyo C9 waxay heli doonaan mushaar bilow eek u qoran sida hoos:

A2	Guddomiya Guud oo leh darajada bilowga ee u dhigmata	
	A5 bilow	Sh.So 1.400
A3	Guddomiye leh aqoonta u dhiganta	
	A 6 bilowga	Sh. So.1.200
A4	La taliye darajada 1aad oo leh aqoonta	
	A7 2bilow	Sh.So 1.080
A5	La taliye darajada 2aad oo leh aqoonta	
	A 7 1 bilow	Sh. So 1.040
A6	La taliye darajada 3aad oo leh aqoonta	
	A 7 bilow	Sh. So 1.000
B 7	Sarkaal qeybta 1aad oo leh aqoonta	
	B 8 bilow	Sh. So 800
C9	Shaqaale qeybta 12aad oo leh aqoonta	
	C 9 bilow	Sh. So. 600

2. Shaqaalaha dowladda iyo kuwa rayidka oo aanan lagu tilmaamin faqradda sare oo ka mid ah qaab-dhismeeda iyo magacaabidda jagooyinka iyo qeybaha A,B,C iyo D oo qaadan jiray mushaar bille ah canshuur ka hor, qaab dhismeedka awgeed waxay dallici doonaan haldarajo ee mushaarkooda, shaqaalaha oo qaadanaayo

mushaar billeh ah oo ka yara darajada bilowga aha ee qeybaha la geliyey, sida ku qoran shaxyada lagu beddeley oo noqon doona qeyb ka mid Dekreetadan.

Qod. 2

1. Kadib markii la tilmaamo in laga bilaabo 1 Abrii 1965 ee qaab-dhismeedka iyo magacaabida shaqaalah rayidka oo haayo howlaha Dowladeed iyo kuwa aan dowlad ahayn oo lagu tilmaamya D.P.R lab 50497 iyo 50500 ee 16 Janaayo 1966, mushaaradka cusub waxay bilaaban doonaan 1da Janaayo 1966;
2. Waxay dowladda oggolatay intii ay misaanayadda dowladda ay qaadi karto, awooda shaqalaha rayidka in la siiyo mushaar ka badan kan sare ku tilmaaman ilaa iyo 31 Disember 1968;
3. Shaqaalaha waxay heli doona inta u dhexeysa laga bilaabo 1da Janaayo 1969;
4. Amarrada ku qoran faqraaha 2 iyo 3 ee isla qodobkaan laguma dabaqi karo shaqaalaha rayida ee qeybta D.

Qod. 3

Kharajka ku bixin doono hirgelinta Dekreetadan waxaa laga soo saari doona cutubyada iyo madaxda la xiriira shaqaalaharayid'da ee haaya howlaha dowlada sida ku qoran sharci lamba. 1 ee Sharcig 1 Janaayo 1966, Misaaniyada hordhaca ee sanad maliyeedka 1966 iyo sanooyinka xig-xigga.

Qod. 4

Dekreetadan waxay hirgeli doonata isla waqtigaan. Waxaa lagu keydin doona Keydka Rasmiga ee Shuruucda iyo Xeerarkaka ee Jamhuuriyadda waxaa lagu soo daabici doona Faafinta Rasmig.

Waxaa la farayaa in loo hoggansanado sharciga loona hoggamiyu cid kaasta

Muqdisho, 22 Janaayo 1966.

Aden Abdulle Osman

Rai'sul Wasaara

Abdirizak Haji Hussein

Wasiirka Maaliyada

Abdirizak Haji Hussein

La arkay, laguna diiwan geliyey diwaan lamba. 1 bogga 86

Muqdisho, 14 Luulyo 1966.

Xisaabiyaha Guud

Mohamed Ahmed Abdilleh